

City Trees


Geedo lacag la'aan ama qiime jaban ee ganacsatada iyo dadka degan Minneapolis

Buugga Tilmaamaha ee Mulkiilayasha Dhirta



treeownersmanual.info

University of Minnesota Extension



extension.umn.edu/planting-and-growing-guides/pruning-trees-and-shrubs

City Trees



minneapolismn.gov/city-trees

Sawir kaga qaad kaamarada muuqaalka (QR Code) ama soo booqo bogga internetka ee beeritaanka dhirta.

Tilmaamaha Beeritaanka Dhirta

Sidee ayaa loo beeraa dhirta weelka lagu keeno

10 talaabo oo fudud oo aad geed kaga beeri gurigaaga

Geedka waa in lagu beeraa daaradda guriga.

1 Go'aan ka gaar halka geedka lagu beerayo

Waa go'aanka ugu cuilus! Tixgeli sida uu geedku ku helayo cadceed dheeraad ah iyo inta dhererkiisu gaarayo 20-30 sano ka dib.


Geedka ku beer ugu yaraan:

- 3 dhudhun kafog waddo lugeedka iyo xeyndaabka guriga.
- 10 dhudhun ka fog dhismaha guriga

Haddii geedku yahay mid kor u dhaafaya 30 dhudhun ka fogee tiirka korontada ilaa 25 dhudhun.

2 Ka goo oo kaliya laamaha dhaawacmay ama dhintay.


Midida gacanta isticmaal si aad u goyso laamaha dhintay ama dhaawacmay meel ka fog salka laanta. Haddii aadan hubin inuu dhintay? Jiridda qofofta ka xoq Haddii ay **cagaaran** tahay geedku waa nool yahay



3 Geedka ka saar weelka lagu keenay

Geedka si tartiib ah dhulka u dhig oo tartiib uga saar weelka lagu keenay oo horay iyo gadaal u ruxrux ilaa xididada dabcaan.

Ka soo saar weelka. Istickmaal maqas haddii geedu ku dhagan yahay.



4

Salka geedka geesaha ka jarjar.

Xididada si wareeg ah ayey u baxaan weelka gudhihiisa. Kala furfur dhirta oo u ogolow in ay dhinacyada u baxaan oo X si is dhaaf ay hoos ugu koraan. Taas waxa ay xididada u ogolaaneysaa in ay koraan, halkii ay goobaabin u kori lahaayeen.


Gacmahaaga ku furfur xidada.

5

U diyaari dhul ay ku koraan.

Xiddada koritaanka waxa ay ku jiraa salka hoose waana halka uu u balaarto oo ka koro.

Inta badan geedaha salka ayaa loo dhigaa weelka lagu keeno, waxaa laga yaabaa in aad u baahato in qeyb ka mid ah ciidda aad raaciso.



6

God u qod

Istickmaal badiil balaaran si aad u qodo god goobaabin oo kale oo hoos u qodan si xidada ugu koraan oogada sarena ugu soo bixin.

Xusuusnoow: Si aad u qoto dheer ha u qodin.

7

Tijaabi inta aad hoos u qoday

Si taxadar leh u dhig geedka godka aad qoday. Hubi in jiridda geedka ay dhulka ka sareysa 1-2 inch.

Gacan qabsiga badiilka u isticmaal in aad qodo aad ku cabirto. Si gudub ah ugu cabior godka. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad geedkaka saarto oo aad godka aad u qodo si aad u gaarto qotoda aad u baahan tahay.

Godka oo aad u qodo oo geedka aad ku aasto waxa ay keeni kartaa in geedku dhinto.

8

Godka ciid ka buuxi

Hubi in geedku toos u taagan yahay, salka xididkuna fadhiyo. Godka ciid ka buuxi, si fudud ciidda cagta ugu riix oo hawada ka saar.

Waa in aad hubisaa in ciidda aad ku rogtay ay gedka ay dhulka ku heyneyso.



9


Alwaax la jarjaray

Alwaax la jarjaray ilaa 3 dhudhun iyo 3 inji qoto ah ku wareeji geedka oo ku baalari oo ka dhigin buur oo kale.

3 inji ee alwaaxa la jarjaray ah ka fogee jiridda si aad uga ilaalisoo in uu bololo.

Alwaax la jarjaray

Kala Furfur xididada



God

10

Biyood (Waraabin)!

Ku waraabi geedka biyo 5 ilaa 10 Gaaloon oo biyo ah todobaadkiiba sadexda sano ee ugu horeysa.

Biyaha ka fogee jiridda ilaa dhamaadka alwaaxa la jarjaray.

Biyaha waraabi bilowga deyrta ilaa dhulku adkaado oo qaboobaha la gaaro.

